Kusoo dhawoow Degmada Groß-Gerau

Macluumaad ku saabsanCarruurta iyo Dhalinyarada qaxootiga ah

Kaligaa ma ku sugan tahay Jarmalka?

Haddii aad kaligaa timid, markaas la xiriir mid kamid ah Dadkaan ama hay'adahaan soo socda:
- Booliiska

- Ururada samafalka ee rasmiga ah

ama sida ugu haboon si toos ah, kooxda Team umA

Waa maxay Team umA?

Anaga oo ka tirsan Team umA, waxaa si gaar ah naloogu tababaray daryeelka Carruurta iyo

Dhalinyarada ee ka soo jeeda Dalalka kale iyo in laga caawiyo nolosha Jarmalka

Micnaha umA waa: Ajaanibta aan qaangaaka ahayn, oo aan lala socon

Ma ka yar tahay 18 jir?

Ma Waalid la'aan baad Jarmalka timid?

Markaa annaga ayaa masuul kaa ah adiga.

Ha raacin shaqsiyaad gaar ah, kuwaas oo kuu soo bandhigay inay ku daryeelayaan.

Xitaa haddii ay kuu ballanqaadaan, waxyaabo badan oo fiican!

Anaga oo ahTeam umA, waxaan ka tirsanahay Waaxda Dhalinyarada iyo Qoyska, tusaale ahaan hay'adda rasmiga ah ee Degmada Groß-Gerau.

Waxaan hubin doonaa, inaad fiicantahay.

Waxaan hubin doonaa, in lagu geeyo meel kugu haboon, halkaas oo aad ka heli doonto cunto, dhar iyo daryeel caafimaad.

(Taas waxaa loogu yeeraa Daryeelka)

Cinwaankayaga ee Degmada Groß-Gerau waa:

Kreisverwaltung Groß-Gerau
Fachbereich Jugend und Familie / Jugendamt
TEAM-umA
Wilhelm-Seipp-Str. 4
64521 Groß-Gerau
Mail: betreuung.uma@kreisgg.de
Teleefanka 06152-989-761
ama Teleefanka 06152-989-552

www.kreisgg.de/uma

Boos in adiga laguu helo

Anaga oo ahTeam umA waxaan kula xalinaynaa, sida imaatinkaaga iyo noloshaada Jarmalka u ekaan karto. (Taas waxaa lagu magacaabaa Clearing)

Markaa waa in la hubiyaa, meesha boos lagaaga heli karo. Ilaa meel laguu helayo, waxaad joogaysaa meshii ugu horeysay ee lagu dajiyay.

(Taas waxaa loogu yeeraa *Daryeelka kumeel gaarka ah.*)

Ma ku leedahay qaraabo ama saaxiibo Jarmalka gudihiisa, kuwaas oo aad rabto inaad u tagto?

Markaas la soo xiriir Team umA. Kadib waxaan si wadajir ah u hubinaynaa, inay taasu tahay fursad adiga kuu fiican.

Haddii uusan Qofna kuu joogin Jarmalka, kaas oo aad la noolaan kartid waxaa jira fursado kale,

tusaale ahaan guryaha Dhalinyarada ama guryaha guruubyada. Halkaas, waxay Dhalinyaradu si wadajir ah kula noolyihiin Daryeelayaa,l guri la isla wadaago.

Laakiin waxaa dhici kara, magaalada aad timid inaysan lahayn boos lagu dajiyo.

Kadib waxaan kuu raadinaynaa meel boos ka banaan yahay oo magaalo kale ama tuulo ah.

Markaa waxaa dhici karta inaad mar kale guurto. (Taas waxaa loogu yeeraa *Kala qaybinta*.)

Waxaad mar walba la hadli kartaa *Team umA*!

U sheeg ***umA-Team***, haddii aad welwel qabto ama dhibaato ama aadan raali ka ahayn Go'aan la gaaray.

Team-ku wuxuu isku dayi doonaa, inuu si wadajir ah adiga xal kuula raadiyo!

Horay ma kuu aqbaleen saaxibadaa ama qaraabadaada ee halkaan jooga?

Fadlan la xiriir **Waaxda Dhalinyarada iyo Qoyska** ee goobta! Tani waa mid aad muhiim u ah.
Magaca waaxdu wuxuu magaalooyinka ama Degmooyinka kale ku yeelan karaa magac ka duwan kann, laakiin mar walba waxaad ka heli kartaa Maamulka magaalada ama Maamulka Degmada ee meshaas.

Waaxda Dhalinyarada iyo Qoyska waa inay adiga kula hubisaa inaad halkaas joogi karto iyo in kale. Waxayna arrintaan kala hadli doontaa saaxiibadaa/qaraabadaada hadday macquul tahayna waxay la xiriiri doontaa Waalidkaa. Waa in la hubiyaa, in boos kugu filan uu yahay oo si wanaagsan laguula dhaqmi doono, oo sidoo kale lagu daryeeli doono.

Waxaana loo baahan yahay in la hubiyo, Qofka sida rasmiga ah masuul kaa ah; laga yaabaa inay saaxibaa ama qaraabadaada noqon karaan, sidoo kale waxaa laga yaabaa inaad hesho Qof masuul kaa noqda.

Si kastaba ha ahaatee, Qoysku wuxuu caawimaad ka heli karaa **Waaxda Dhalinyarada iyo Qoyska**.

Xitaa hadii xaalkaagu fiicnayn ama aad u baahan tahay taageero nooc kasta ah, markasta la soo xiriir ***Team umA***. Markaa waxaan si wadajir ah kuula hubinaynaa waxa adiga kuu fiican.

Waa maxay Masuulku muxuuse qabtaa?

Haddii aad ka yartahay 18 jir, oo aad Waalid la'aan ku tahay Jarmalka, waxaad heli doontaa *Nin masuul kaa noqda* ama *Naag masuul kaa noqota*.

Ninka masuulka kaa ah ama Naagta masuuliyadda kaa ah, waxay qabanayaan hawlaha ay caadi ahaan Waalidka qaban lahaayeen.

Waxaa sidoo kale macquul ah, in qof ka tirsan xubinta qoyskaaga ah ama qaraabadaada ah inuu masuul kaa noqdo.

Haddii Waalidkaa yimaadaan jarmalka, masuuliyaddu markaasay dhamaanaysaa.

Miyaad Jarmalka kula joogtaa Waalidkaa/ ama hal Waalid?

Haddii aad la timid Waalidkaa, oo aadan garanayn meel aad aado, waxaad qaxootiga kale kula noolaan doontaa *Xarumaha koowaad ee qaxootiga (EAEH)*. Waxaa laga yaabaa, inaad muddo yar kadib u guurtaan Gobol kale ee Federaalka ah. *(Kala qaybinta)*

Xitaa hadii aad halkaan la joogto Qoyskaaga, waxaad la soo xiriir kartaa **Waaxda Dhalinyarada iyo Qoyska**, haddii aad u baahan tahay taageero.

Shaqaalaha **Waaxda Dhalinyarada iyo Qoyska** waxay u joogaan inay taageeraan dhammaan Qoysaska jooga Jarmalka hadday u baahan yihiin caawimo,

xitaa haddii aysan ahayn Qoysas Jarmal ah. Waxay ku dadaalaan, inay Carruuta iyo Dhalinyaradu ku koraan caafimaad. Waxay la taliyaan oo caawiyaan Qoysaska, sabab kasta ha ahaatee, wixii aysan samayn karin kaligood.

Marka haddii aad u baahan tahay caawimo, maadaama

- ….uu Qoyskaaga ka jiro dagaalo badan,
- ….ama Hooyadaa ama Aabahaa aysan daryeeli karin adiga ama walaalahaa,

  maadaama ay iyagu laftoodu fiicnayn oo ay tusaale ahaan maalintiyoo dhan sariirta jiifaan ama ay aad u murugaysan yihiin,
- ….ama aan Iskuul lagaa diwaan galin karin,
- …ama aad jeceshahay inaad Jarmal barato,

markaas oo kale la soo xiriir **Waaxda Dhalinyarada iyo Qoyska**.

Haddii aad Iskuul dhigato, waxaad sidoo kale la xiriiri kartaa *Shaqaalaha Sooshalka ee iskuulada*.
https://www.kreisgg.de/bildung/schulsozialarbeit/standorte/

Sharciga (Nooca sharciga?)

Waxaa caqli fiican ah, inaad la soo xiriirto *xarunta talo bixinta*, taas oo ka jawaabi karta su'aalahaaga badan oo ku taageeri kara.

Raadi adeegyada la talinta ee Qaxootiga & Socdaalka - **https://adressen.asyl.net/**

Caafimaadka

Maxaad samayn kartaa, haddii aad qabto dhibaatooyin jireed ama maskaxeed ama xanuun?

Waxaad xaq u leedahay, inaad Dhakhtar kala hadasho dhibaatada iyo sidoo kale in lagu daaweeyo.

Patientenservice tel. 116117

https://www.116117.de

Taasu waxay khusaysaa dhibaatooyinka jidhka, laakiin sidoo kale dhibaatooyinka maskaxda. Tusaale ahaan, haddii aadan si fiican u seexan karin maadaama aad mar walba ka fakarayso wixii dhacay, ama haddii aad si joogta ah u baqayso, aad neerfis tahay ama aad u xanaaqsan tahay. Markaas oo kale, raadso caaawitaan! La hadal Qof aad ku kalsoon tahay, oo u sheeg sida aad dareemayso!

Haddii aad u baahan tahay caawitaan degdeg ah, waxaad had iyo goor aadi kartaa qaybta degdegga ah ee isbitaalka ama wac **112** (Lambarka degdegga). Waxaad heli kartaa cawimaad, xitaa haddaadan haysan kaarka caafimaadka.

Waxaad wakhti kasta su'aalahaaga kala soo xiriiri kartaa ***Team umA***.

Maxaa laga wadaa ta Iskuulka?

Iskuulka iyo tababarka xirfadeed waa tallaabooyinka ugu muhiimsan ee mustaqbalka wanaagsan oo sugan ee Jarmalka. Nidaamka Iskuulada Jarmalka way yara adagyihiin, maadaama Gobol kasta ee Jarmalka dhexdiisa ah wuxuu leeyahay sharci u gaar ah.

Si kastaba ha ahaatee, Jarmalku Iskuuladu waxay waajib ku yihiin dhammaan Carrurta iyo Dhalinyarada, taas oo macnaheedu yahay, inay xaq u leeyihiin waajibna ku tahay inay dhigtaan Iskuulka.

Kahor inta aadan rabin inaad wax kale samayso, waa inaad **barataa Jarmalka**. Luqadda Jarmalku waa furaha wax kasta oo kale!

Staatliches Schulamt für den Kreis Groß-Gerau

Aufnahme- und Beratungszentrum

Tel. 06142 5500 0

E-Mail: poststelle.ssa.ruesselsheim@kultus.hessen.de